Soomaliya
Warbixinta Duufaanta Gati #4

26ka Nofeembar 2020

Qodobadda

- Duufaanta Gati ayaa ku dhufatay Soomaaliya, 22-da ilaa25-ta Nofeember ee 2020.
- Maamulka deegaanada ee duufaanta saameesay ayaa ku qiyaasay 180,000 qof eey waxyeelesay duufaanta halka 42,000 qof ka barakaceen guryahooda si ku meel gaar ah.
- Duufaanta ayaa burburisay 20 fasal ee iskuulada ku yaalo degmooyinka Xaafuun, Garduush, Baarmadow, Foocaar, Hurdiya iyo Caris, taaso eey wax ku baran jireen ilaa 500 arday.
- Maamulka Puntland ayaa codsaday in gargaar deg deg lalasoo gaaro dadka eey saameesay duufaanta si eey guryahood dib ugu dayactiraan.

Xaaladda Guud

Duufaanta Gati ayaa Soomaaliya ku dhuftay 22-da ilaa 25-ta Nofeember ee 2020. Si kasta ha ahaatee waxaa jiray roobab sababay in duufaantu sii socoto Maamulka deegaanada eey duufaanta ka kacday ayaa qiyaasay in dad gaaray ilaa 180,000 qof eey saameesay duufaanta, halka 42,000 qof eey ka barakaceen guryahooda. Sida laga soo xigtay maamulka Puntland ayaa xaqiijiyay in ilaa siddeed qof eey ku dhinteen duufaanta sidoo kale 11,500 qoysas eey saameesay duufaanta deegaanada ku dhow xeebaha Puntland.



Warbixin hordhac oo eey soo saareen hay'adaha arimaha bini'aadamnimada iyo maamulka musiiboyinka ayaa tilmaamay in duufaanta eey gabi ahaan waxyeelesay ilaa 20 fasal oo ku yaalo degmooyinka eey kamid yihiin; Xaafuun, Garduush, Baarmadow, Foocaar, Hurdiya iyo Caris, islamarkaasi eey saameen ku yeelatay in ka badan ilaa 500 arday oo wax ku baranaayay iskuulada. Waxaa sidoo kale la soo sheegay in degmooyinka Qandala iyo Taageer eey ka jirto biyo yari kadib markii waxyeelo soo gaartay tubooyinka biya soo qaadi jiray.

Duufaanta ayaa waxyeelesay dadka iyo deegaanka, iyadoo burburisay qalabka kaluumeesatada, hadana dishay xoolo halka eey daadad ku fatahmeen beeraha.waxaa sidoo kale wararka eey sheegayaan in deegaanada Somaliland sida Berbara iyo gobolada Waqooyi Galbeed eey ka da'een roobab xoogan. Maamulka deeganadaasi ayaa qaaday talaabo lagu yareenayo khatarta iyo in taxadir la sameeyo si dhibaatada eey u yaraato. Maamulka magaalada Berbara ayaa ka digay in dadka eey ka fogaadan dhismooyinka hore taaso si fudud u soo dumikaraan madaama eey roobab is xig-xiga eey ka da'een magaalada.

Sida laga soo xigtay FAO/SWALIM, ayaa tilmaameeso in saameenta duufaanta eey dhibaatoyin ku reebtay dadka ku nool goobaha eey ku dhufatay. Waqooyi Galbeed iyo Awdal ayaa laga soo sheegay in biyaha xeebaha eey aad u sareeyaan. Halka deegaanada Bari iyo Sanaag eey biyaha badda eey ku soo labteen si caadi ah.

Isku xirka iyo ka-falcelinta Bini'aadamnimada

Hay'adaha gargaarka oo la shaqaynayo hay'adaha dowliga ah ayaa bilaabay ka-falcelinta dadka u bahan gargaarka gaar ahaan goobaha eey saameesay duufanta Gati. Kooxda nadaafada oo la shaqeyneyso wasaarada caafimadka ayaa 3,000 agabyada nadaafad ah u qeebisay ilaa 9,000 qof si looga fogaado cudurada biyaha ka dilaaco. Waxaa intaasi dheer waxaa la rajaynayaa in eey soo gaaran magaalada Muqdisho agabyo nadaafada si loo gaarsiiyo goobaha eey ka jiran baahiyaha.

Kooxda cunada ayaa gaarsiisay lacago ilaa 10,000 oo qoys oo ku sugan Bossaso, Xaafuun, Hurdiya iyo Iskushuban. Hay'adaha ayaa sameeyay baaritaano goobaha eey duufaanta ku dhufatay.Hay'adaha caafimaadka iyo nafaqada ayaa bixiyay adeego caafimaad iyo midka nafaqada goobaha eey saameesay duufanta gaar ahaan Bossaso, Xaafuun, Iskushuban iyo Hurdiya taaso ujeeda ahaad in la gaarsiiyo ilaa 10,000 qoys. Adeegyada nafaqada iyo caafimadka ayaa laga bilaabay magaalada Bosaaso waxaa intaasi dheer in kooxda caafimadka eey u dhaqaaqi doonan goobaha kale ee duufaanta ka jirto markii la nadiifiyo wadooyinka.

Duufaanta ayaa dishay xoolo badan ee deeganada Puntland, OCHA

Kooxda nafaqada ayaa waxay si dhaw ula socotaa dadka eey waxyeelada kasoo gaartay duufaanta si loo hubiyo adeegyada nafaqada islamarkaana looga fogaado in eey dhacdo nusqaan gaar ahaaan kiisas nafaqo darada iyo barakaca bulshada.

Kooxda caafimadka iyagoo wada shaqeynayo kooxda nafaada iyo kooxda isku xirka iyo maamulada kaamamka ayaa gaarsiinayo bulshada fariimo la xiriir COVID-19 iyo cudurada laga qaado biyaha waxaa ujeeda tahay in la gaaro dadka barakacayaasha iyo goobah eey dhibaatada ka dhacday.

Kooxda guryaha ayaa qeebiyay ilaa 500 agabyada aan cunada ahayn iyadoo la isticmaalay ilaa $245,000 lacag si wax looga qabto arimaha deg deg ah gaar ahaan dadka eey saameesay duufaanta. Agabyada guryaha ayaa la qorsheenayaa in laga soo qaado magaalada Muqdisho malmaha soo socda.

Kooxda saadka oo la shaqeeneso OCHA ayaa gacan ka geestay dardargalinta howlaha xamuulka ee loo qaadayo magaalada Boosaaso ilaa 10 malmood. Tani waxaa fududeeneesaa in si deg deg loo gaaro goobaha iyo dadka ee saameesay dhibaatada duufaanta dhinac kale xamuulka ayaa laga soo qaadayaa magaalada Muqdisho si loo gaarsiiyo dadka la saameyay.

Kooxda isku xirka iyo maamulada kaamamka ayaa magaalada Boosaaso ka wado howlo lagu nadiifinayo goobaha eey biyaha fadhiistaan si loo yareeyo khatarta cudurada iyo in la halo biyo nadiifa ah. Kooxda ilaalinta ayaa ka sheqeenayo kormeerida dadka dhibaatada saameesay iyo in la ogaado baahiya gaar eey qabaan si kor lagu qaado ilaalinta iyo ka-falcelinta dhibaatada.

Nusqaamaha iyo baahiyaha Bini'aadamnimo

Maamulka Puntland ayaa codsay in gargaar bini'aadamnimo la soo gaar siiyo dadka eey saameesay duufaanta gaar ahaan agabyada guriga, adeegyada caafimada, biyo nadiifa ah iyo dib u dayac tirida wadooyinka.

Kooxda loo xilsaaray duufaanta Gati ayaa soo uruuriyay warbixino la xiriira goobaha eey dhibaatada ka dhacday si loo badbaadiyo nolosha bulshada ku nool goobaha eey duufaanta ku dhufatay.

Warbxin dheeraad ah, fadlan kala xariir:

Ogoso, Erich Opolot, Head of Public Information, ogoso@un.org, Tel: +252 616 548 007
Yahya Dahiye, Public Information Officer, yahya.dahiye@un.org, Tel: +252 618 180926
Mursal Ali, Public Information Officer, mursalali@un.org, Tel: +252 615 679998

Warbixin dheeraad ah, fadlan booqo: www.unocha.org/Somalia | www.humanitarianresponse.info/operations/somalia | Twitter: @OCHASom | Facebook: UNOCHA